sabaqal mufariduun way hor mareen kuwa Ilaahay xusa

Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ayaa marayey dariiqa makka, wuxuu maray buur la dhoho Jumdaan, wuxuu yiri: "socda kani waa jumdaane, sabaqal mufariduun way hor mareen kuwa Ilaahay xusa" waxay dheheen: mufaridiintu waa maxay Rasuulka Ilaahayow? wuxuu yiri: "waa raga iyo dumarka xuska Ilaahay badiya".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey mansilada ay joogaan kuwa Ilaahay xuskiisa badiya, taasoo ah inay kaligood noqdeen oo qayrkood kaga hormareen darajooyin sare oo janada ah, wuxuuna ku shabahay buurta jumdaan ee ka duwan buuraha kale.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/3719